

## **Colaadda guriga waa mid waxyeelleynaya qoyska oo dhan Domestic violence hurts the whole family**

Haddaad moodo in dumarku badanaaba halis u yihiin colaad uga imaaneyso banaanka ka baxsan ammaanka guriga, ha-ku khaldamin.

Waxay u badan tahay in dumarka lagu weeraro hoygoda ayna weeraraan dadka ay la nool yihiin. Colaadda guriga oo saameysa dumar da' walba leh, waddan kasta oo ay joogaan, waa faraxumeyn ka mid ah noocyada itaalsheegadka.

Waxyeelada jir ahaaneed ka sokow, waxaa ka mid noqon kara cagajugleynta, aflagaaddada ama xadgudubkan. Waxaa kale oo ka mid noqon kara faragelinta xornimada qofka taasoo imaaneyso kolka qoyskeeda ama asxaabteeda laga jaro, amaba loo diido lacag ay xaq u leeyihiin. Xadgudubka noocyada leh hal wax ayey ka wada simman yihiin - waa siyaabo ay dadka qaar (badanaaba nin, marar dhif ahna naag) isticmaalaan si ay uga gacan sarreeyaan qofka lammaanahooda iyo mararka qaarkoodna xubnaha kale ee qoyska.

Dadka qaar ayaa rumeysan in xadgudubkani yahay arrin gaar ah oo u taalla qoyska. Hase ahaatee Awstaraaliya colaadda gurigu waa dembi ay xaq u leeyihiin qoysku in laga ammaan geliyo. Ku qarinta irridaha xiran gadaashooda waa mid oggolaaneysa xadgudubku inuu sii socdo una geysaneysa dhaawac xubnaha qoyska kaga yimaadda xagga jir iyo shucuurba. Haddii aan waxba laga qaban, xadgudubku wuu ka sii daraa, taasoo mararka qaar keenta dhaawac culus ama dhimashaba.

Haddii xataa qof keliya lagu xadgudbayo – aalaaba oorida ninka u dhaxda – waa mid weli saameyneysa xubnaha kale ee qoyska. Carruurta ku dhex koreysa qoys leysugu itaalsheeganayo waxaa laga yaabaa iney dhibaatooyin u keento – waxaa laga yaabaa iney dareemaan in dadka qaangaarka ahi gaar ahaan ragga, aan la aamini karin; waxaa laga yaabaa iney u keento dhibaatooyin la xiriira khamriga ama maandooriyeyaal kaleba. Markey koraan oo ay xaas iyo carruur yeeshaan waxaa laga yaabaa iney u itaalsheegtaan. Sidaa darteed ayaanan u oran karin colaadda gurigu qof ay shaqadiisa tahay ma jirto – waa dhibaato saameyneysa bulshada oo dhan.

Haween badan ayaa sanooyin u dul qaata colaadda guriga. Waayo mararka qaarkood waxay dareemaan iney tahay mid ay muteysteen, ama waxay is yiraahdaan raalli baan ka ahay iyagoo u aaneynaya dhibaatooyin la xiriira khamaarka, khamriga ama xigaalaba. Hase ahaatee qofna ma mudna xadgudubkan, marmarsiinyana ma lahaan karto.

Sidee bay hawenka iyo carruurtoodaba uga magan geli karaan colaadda guriga? Waxaa jira adeegyo kaa caawin kara kuwaas oo ku siinaya la talin aad ku waantoobeyso, talo sharci iyo hoy deg deg ahba. Takhtar, Xarunta Caafimaadka Bulshada ama Xarunta Caafimaadka Haweenka ayaadna kala xiriiri kartaa. War arrimahan ku saabsan waxaad ka heleysaa adigoo waca telefoonka Colaadda Guriga oo ah 1800 65 64 63. Haddii aadan ku hadli karin af Ingiriiska, adeegga tarjumadda iyo ka tarjumidda ayaa kaa caawin kara telefoon diridda.

Haddii ay hawentu go'aansato iney reerkeeda ka tagto, waxaa laga yaabaa iney u baahato talo sharci iyo kaalmo la xiriirta sidii ay ku heli laheyd Ammarka ka hor-istaagga colaadda Apprehended Violence Order (AVO). Kani waa hab sharciyeed ninka uga diga in

ay u itaalsheegtaan, cagajugleeyaan amaba handadaan haweenka u dhaxa. Haddii uu ka dhega adeygo ammarka, waxaa laga yaabaa iney xiraan boliiska.

Talo sharci iyo kaalmo ku saabsan sida aad ku heleyso AVO waxaad ka heli kartaa Rugta Xaakimka ee maxkamadda kuu dhow. Maxkamadaha qaarkood waxay kale oo leeyihiin hab loogu gurmado colaadda guriga, kaas oo isticmaala shaqaale ku hadla laba luqadood iyo turjibaanno caawiya dadka wax yar kaga hadla ama aan ku hadlin af Ingiriiska.

Kaalmo doonashadu wuxuu noqon karaa tallaabo adag oo la qaado – hase ahaatee waa tallaabada ugu horreysa ee kuu horkaceysa nabad-kunoolaashada qoyska.

Dadka leh saaxiibbo ama qaraabo ay soo wajahday colaadda guriga ayaa iyagana gacan ka geysan kara. Iyadoo aan iyada lagu oran waad ka badbadineysaa, ama “isaga dulqaado” amaba “si fiican isugu day”, laakiinse la aamino taagerana la siiyo. Jaaliyaddu waxay gacan ka geysan kartaa iyadoo dhaleeceysa colaadda guriga yiraahdana ma aha wax la aqbali karo.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad la xiriirta turjibaan kaaga af celiya luqadda Ingiriiska marka aad telefoon dirsaneyso, wac telefoonka Adeegga Tarjumaadda iyo Ka Tarjumidda (TIS) oo ah 131 450.

Akhbaar caafimaad oo dheeraad ah kuna qoran luqaddaada waxaad ka heli kareysaa goobta xub caarada Isgaarsiinta Dhaqamada Kala duwan ee <http://mhcs.health.nsw.gov.au>

Lambarrada telefoonada waa kuwo sax ah waqtiga ay qormadani soo baxday hase yeeshee si joogto ahna looma cusbooneysiyo. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato in aad ka hubiso buugga telefoonka.

**REVIEWED**  
April 2003  
NSWMulticulturalHealthCommunicationService